# DOWLAD GOBOLEEDKA JUBBALAND EE SOOMAALIYA

## XEER

**Magaciisu yahay**

**Xeerka Qoondeynta Lr. 1, 2021**

## EE 12-KA BILOOD EE 1-DA JANNAAYO 2021 ILAA 31-DA DISEMBAR, 2021

# SHURUUCDA DOWLAD GOBOLEEDKA JUBBALAND

## XEERKA QOONDEYNTA LR 1, 2021

Xeer Sanduuqa Maaliyadda Mideysan looguga qoondeynayo dhaqaale lagu bixiyo kharashaadka dowlad goboleedka Jubbaland muddada 12(ka) bilood ee dhammaaneysa 31kaDecember 2021 ayuu Madaxweynuhu u soosaaray sida tan:

**CUTUBKA KOOWAAD**

***QODOBO HOR-DHAC AH***

**Qaybta 1aad: Magaca Xeerka iyo Waqtiga uu Dhaqan-gelayo**

Amarkaan waxaa uu magaciisuyahay "Xeerka Qoondeynta Lr 1, 2021" waxaana uu dhaqangeliyaa taariikhda lasaxiixo.

**Qaybta 2aad: Qeexid**

Xeerkan dhexdiisa, haddii aaney xaaladu macno kale u sameyneyn, ereyadaan iyo oraahahan soo socda waxaa ay yeelanayaan macnaha halkaan lagu siiyey:

**"Sanduuqa Maaliyadda Mideysan"** waxaa loola jeedaa sanduuqa ay ku

mideysanyihiin dhammaan dakhliyada Dowlad Goboleedka Jubbaland, waxaana loo adeegsadaa in laga bixiyo lacagaha, sida ku qeexan Qaybta 4aad ee wareegtadan;

**"Golaha Shacabka Jubbland"** waxaa loola jeedaa aqalka keliya ee shuruuc-dejinta dowlad-goboleedka Jubbaland waxaana uu ka koobanyahay baarlamaanka iyo saraakiisha kale ee loo xulo.

**"Madaxweynaha"** waxaa loola jeedaa Madaxweynaha dowlad goboleedka Jubbaland

## CUTUBKA LABAAD:

## QOONDEYMO

### Qaybta 3aad: Lacagaha Laga Qoondeeyo Sanduuqa Maaliyadda Mideysan

Xeerkii Qoondeynta ee Lr. 2, 2020 waa la buriyey. Kharashaadka muddada u dhaxaysa 1daJannaayo ilaa 31kaDisembar 2021 waxaa Sanduuqa Maaliyadda Mideysan looga qoondeynayaa si waafaqsan ujeeddooyinka iyo qaddarka (tirada) lagu muujiyey Jadwalka 1aad ee ku lifaaqan Xeerkan. Iyada oo ku xiran sida ay Wasaaradda Maaliyadda uga soo baxdo shuruudahan hoos ku taxan ugu dambeyn 30ka Juun 2021.

- Nidaamka loo maro canshuur dhaaf yada waa in loo soo gudbiya Baarlamanka
- In ay xisaab-xirkii (Bayaamada Maaliyadeed) ee Sanadkii 2020kii oo hanti dhowr lagu sameeyey ay Baarlamaanka u soo gudbiso wasaaradda iyada oo la raacayo Qaybta 30aad ee shurucda maareynta maaliyada (PFM).
- Wasaaradda waa in ay soo gudbisaa qorshe lagu bixinaayo qaansheegadka xubnaha barlamanka (Xeer Lr, 1, 2021) laguna soo gudbiyaa habkii loo bixin lahaa in ka yar 3 billod laga bilaabo taariikhda xeerkan la ansixiyay.
- Wasaaradda waa in ay dib u eegta oo soo gudbisaa miisaniyad wadata waax ama qayb (department) lagu saleeyoo laguna magacaawa qaansheegadka baarlamanka oo waaxda madax lagu bixinaayo qansheegadka barlamanka ka hor bisha lixaad ee sanadkan 2021.

- Waa in wasaaraddu soo gudbisaa habkii mushaharaadka billaha ah xubnaha barlamanka joogto loogu heli lahaa. Wasaaradu waa in ay kusoo gudbisaa jadwalka rasmiga ah ee muujinaya hab bixineedka mushaharka xubnaha mudo 3 bilood laga bilaabo taarikhda la hirgeliya sharcigaan.
- Hay'adaha dowladda iyo dhamaan laamaha dakhliga ama lacagaha aruuriya waa in ay isticmaalaan Koonta Mideysan ee Jubaland (treasury single account).
- Laamaha dowladda ee hirgelin waaya Koontada mideysan waa in loo soo gudbiyaa Barlamanka in ta ka horeysa bisha lixaad ee sanadkan 2021.
- Waa in la bilaabaa aruurinta canshurta guryahay laguna bilaabaa in ka yar 3 billod.
- Waa in la bilaabaa qaadashada wadista gaadiidka (Driver's license) daraweliinta oo dhan laguna bilaabaa in ka yar labo bil guddaheed.
- Diiwangelinta baaburta waa in lawaafajiyaa sharciya
    - Wasiirka maaliyadda oo keliyta ayaa amri kara in baabuur canshuur la aan ah dekedda looga soo saaro wuxuu ku amri karaa xeer hoosaad barlamanka ogolaadey.
- Waa in la helaa sanad lifaaqaa warqadda akhbaarta madaxweynaha ee sanad maaliyadeedka dowlad goboledka jubaland (presidential budgetary massage).
- Waa in la helaa qorshaha dowladda ee ku aadan miisaaniyadda sanadka. Laguna qeexaa waxyaalaha iyo arimaha tixgelinta leh, halkaa dowladda ku isticmaali doonta lacagaha iyo qeexid waxa ahmiyad la siinaayo.
- Wasaaradda waa in ay mideysa deemaha lagu leeyahay dowlad jubaland una soo gudbisaa barlamanka milkiilayasha deemaha ku leh dowladda iya cadadkaba.
- Wasaaradda waa in aay soo gudbisaa shuruc hoosaad wazaaradaa ku shaqayso iyo maamulka waxyada wazaaradda. (Internal operation manuals).

**Qaybta 4aad: XadidaadahaKharashaadka**

Iyadaoo la raacayo Qaybta 22aad ee Wareegtada Maareynta Maaliyadda Maamulka ee 2017, marka laga reebo hawlgalada ku-meel gaarka ah ee maareynta lacagaha khasnadda, iyo kuwa waafaqsan xeerarka guud, waa in aan lacag laga bixin Sanduuqa Maaliyadda Mideysan marka laga reebo shey lagu aqoonsadey qiyaasaha miisaaniyad-sanadeedda ee ku yaalla Jadwalka 1aad, oo hadba wax loogaga beddelayo u kala-wareejinta lacagaha miisaaniyadda dhexdeeda iyo/ama lagu soo saaro Wareegto Qoondeymo Dheeri ah.

**Qaybta 5aad: Kharashaadka Waxaa Xaddidaya Dakhliga**

Waaxda Khasnaddu waa in ay bixisaa maaliyado ama lacago la kharash-gareeyo oo ku sargo'an dakhliga ama ilaha kale ee maaliyadeed ee Xisaabta Keliya ee Khasnadda Dowlad Goboleedka Jubbaland– Miisaaniyadda Caadiga ah.

**Qaybta 6aad: Wax kabeddelidda Qadarka/Tirada Lacagaha La Ansaxiyey.**

Khasnajigu waxaa uu qadarada/tirooyinka lacagaha la ansaxiyey u kala wareejin karaa qaybaha miisaaniyadda ee Wasaarad ama Wakaalad/Hay'ad Leedahay ee kujira Jadwalka 1aad ee Xeerkan, waa marka dib-u-qoondeyntu aaney kabadneyn, wadarahaan, 10% qaybta wax lagaqaadayo.Lacagaha loo kala wareejinayo Wasaaradaha lama oggolaanayo iyada oo aan wax ka beddel lagu sameynin Jadwalka iyada oo loo marayo talaabooyin Qoondeymo Dheeri ah.

Sharciyada sare waxaa laga soo reebay mashaariicda ay deeq bixiyaashu maalgaliyaan. Iyada oo oggolaansho ay horey uga wada gaareen deeq-bixiyaha iyo Khasnajiga kala wareejinta madaxyada iyo Wasaaradaha dhaxdooda ah ee tirada/boqolayda loo cayimay, taas oo aan lagu dabakheynin xaddidaadaha kor lagu xusey

**Qaybta 7aad: Kharashaadka Ku-talogalka ah**

Iyada oo la raacayo Qaybta 13aad ee Wareegtada Maareynta Maaliyadda Jubbaland ee 2017, Qoondeymaha ku-talogalka ah waxaa lagu bixin karaa kharashaadka degdega ah ee aan la sii ogeyn ee ka dhasha xaalado degdeg ah oo lacagta lagubixinayana aan dib loo dhigi Karin ilaa laga ansaxiyo miisaaniyad dheeri ah ama Miisaaniyad-sanadeedda Mideysan ee soosocota iyada oo aaney taasi raad aad u ba'an ku yeelan danta dadweynaha.

**Qaybta 8aad: Dhaqan-Galka Xeerka.**

Xeerkani waxaa uu dhaqan galayaa marka golaha Barlamanka Jubaland ansixiyo uuna saxiixo madaxweynaha dowlad Goboledka Jubbaland ee Somalia.

Waxaan saxiixay oo aan shaabadeeyey maanta oo ay taariikhdu ________________.

**ALLA MAHADLEH**

Abdi Mohamed Abdirahman

Guddomiyaha Golaha Wakiiladda

Dowlad Goboleedka Jubbaland ee Somalia